

## MUQDISHO IYO CAQABADAHA HORTAAGAN.

Tan iyo bilowgii 2011ka kadib markii dowladda Somalia oo taageero ka helaya ciidanka Midowga Africa (AMISOM) ku guulaysatay in ay ka xorayso Magaalada Caasimada ah ee Muqdisho kooxda argagixisada ee Al-shabab waxaa dib u soo noqday nololaha iyo bilicda Magaalada si tartiib tartiib ah, hada oo xiligaas laga joogo mudo Afar sano ah magaalada waxaa ka muuqda isbadallo baaxad wayn.



Magaalada waxaa hada ka socda Mashaariic ay wadaan dowlado asaxiib la ah Dalka Soomaaliya oo ay ugu horeyso Dowladda Turkiga kuwaas oo hada dhisaya qaybo ka mid ah wadooyinkii iyo dhismayaashii ku burburay dagaalada sokeeye.

waxaa dib loo dayactiray dhowr wado oo muhiim u ah isku socodka Magaalada Muqdisho.



Sidoo kale dhawaan waxaa laga hirgaliyay Gagada Caalamiga ah ee Aden Ade International Airport dhismaha Terminal Cusub iyadoo markii ugu horaysay mudo 25 sano ah magaalada Muqdisho ay ku xirantay dunida inteeda kale.



Diyaaradda Caalamiga ah ee Turkish Airways ayaa duulimaad maalinle ah ku timaada magaalada Muqdisho taas oo u saamaxday dad badan oo qurbo joog Soomaali ah in ay dalka dib ugu soo noqdaan.

### **SHAQO LA'AANTA DHALINYARADA**

Soomaaliya waxey ka mid tahay meelaha shaqo la'aanta dhalinyarada ay ugu badantahay. Waxaa lagu qiyaasaa in ay ka badantahay lixdan iyo todobo boqolkiiba 67%. Warbixintan oo ay soo saartay Barnaamijka Horrumarinta ee Qaramada Midoobay ayaa lagu sheegay in 82% sideetan iyo labo boqolkii ay Soomaalidu ay yihiin dad fuqara ah, meesha 73% boqolkii ay ku noolyihiin wax ka yar \$2 dollar.

Dhalinyarada badankoodu waxey u guureen wadamada deriska ah si ay ugu helaan fursado wannaagsan; qaarkoodka waxay ka gudbeen badaha iyagoo u socoda wadamada Yurub. Warbixintu waxay lagu sheegay in badanaa dhalinyarada ay isku wax ka cabanayaan oo ah shaqo la'aan.

Si kastaba ha ahaatee, dad qubaro ah waxey sheegeen in xalka kaliya uu yahay in dawlada Soomaaliyeed ay u abuurto shaqooyin dhalinyarada meeshii ay ku tiirsanaan laheed ganacsiyada dadka ee gaarka loo leeyahay in ay shaqaalaysiiyaan dhalinyarada wadanka.

Warbixintu waxey ka digtay in dhalinyarada hadii aan shaqo loo abuurin ay qaadan karaan qoryaha, iyadoo noqonaya dagaalyahano ama mooryaan. Warbixintu waxey kaloo ugu yeertay wadamada shilimaadka bixiya in ay wajahaan waxa sababaya iska hor imaadka iyo horrumarinta fog eek u aadan dalka Soomaaliya.

Soomaaliya waxaa heesta hogaamiya xumo taas oo keeneesa ineysanba dhibeen waxa heesta dhalinyarada. Dhilinyarada waxaa haga kara hogaamiyayaal leh aragti fog kuwaas oo ka dhigi kara kuwo wax qabsada, laakiin waxaa Soomaaliya heesta hogaamiyayaal arigtidoodu aysan soo dhaafsiisneen Danahooda gaarka ah.

Si kastaba rajada Guud ee dalka ayaa ah mid isk wanaagsan iyadoo la dareemayo is badalo badan.

Qore: Mohamed Tahlil Ahmed